

Ogeysiin ku aaddan Asturidda Xogta Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul ee 2023-2024

Gobolka Minnesota wuxuu maalgelin uu ka helay Qorshaha Badbaadinta Mareykanka ee Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka ku bixiyaa Barnaamijka Flipside ee Saacadaha Iskoolka ka Dib lagu qabto degmada Saint Paul Public Schools si ardayda dugsiyada dhexe loo siiyo taageero tacliimeed oo tayo sare leh iyo waxqabadyo waxbarasho. Barnaamijka Flipside waa inuu ururiyaa xogaha kaqeybgalayaasha oo uu la socdaana ka-qaybgalkooda. Ururinta xogahan ayaa qayb ka ah dedaal ballaaran oo lagu wanaajinayo fahamka barnaamijyada wax ku oolka ah, xiriirka ka dhexeeya ka qeybgalka barnaamijka, aqoonta xagga bulshada iyo shucuurtta iyo natiijooyinka waxbarashada, iyo in la wanaajiyo tayada iyo helitaanka barnaamijyada taageero dhalinyarada iyo qoysaskooda reer Minnesota.

Xog nooceet ah ayaa la ururin doonaa?

- Wakhtiga uu ardaygu ku bixiyay barnaamijyada, oo ay ku jiraan tirada saacadaha iyo maalmaha uu yimid;
- Xogaha ardayga sida magaca, taariikhda dhalashada, lambarka aqoonsiga ardayga (MARSS) iyo degmada iskoolkiisa.
- Jawaabaha ra'yi-uruurinta quseysa waxa ay ardaydu kala kulantay barnaamijyada iyo waxqabadyada. Ra'yi-ruurintaan waxaa laba jeer sannadkii la siyyaa dhammaan kaqeybgalayaasha barnaamijka Flipside.

Yaa arki kara xogaha shakhsii ahaaneed ee loo ururiyay cilmi-baaris ahaan?

Helitaanka xogaha gaarka loo leeyahay ee ku saabsan ilmahaaga (sida lambarkiisa aqoonsiga ardayga, magaciisa, fasalkiisa, taariikhda dhalashada, iskoolka, jinsiga, iyo ka qaybgalkiisa barnaamijka) si adag ayaa loo xaddidi doonaa si looga hortago wadaagista xogo aan la fasixin. Dadka iyo ururada laga yaabo inay helaan xogta ardayga waxaa ka mid ah:

- Shaqaalahaa Saint Paul Public Schools ee ka shaqeeyo gudaha Flipside.

Shaqaalahaa ururada bixiya waxqabadyada ilmahaaga. Ururadaasi waxaa ka mid ah **Augsburg College, Construction Careers Foundation, Interfaith Action, JK Movement, Keane Sense of Rhythm, Saint Paul Parks and Recreation, Saint Paul Public Library, Saint Paul Urban Debate, Sanneh Foundation, Science Museum of Minnesota, St. Olaf College, University of Minnesota Urban 4-H, University of Minnesota America Reads, Voyageur Outward Bound, Women's Initiative for Self-Empowerment (WISE – GGALs), ETS/TRIO**

- Shaqaalahaa ay ka mid yihiin kuwa hubiyo qaabka ay wax u socdaan (auditors), kuwaas oo xaq u leh inay dib u eegaan shaqada Saint Paul Public Schools.
- Shirkadaha ThomasKelly Software Associates, LP and CitySpan Technologies, kuwaas oo na siiyo aaladda tiknoolaji ee raadraacdha xogta ardayga iyo xogta ka qaybgalkiisa barnaamijka Flipside.
- Shaqaalahaa Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education) kuwaasoo isticmaalo xogaha si ay u fahmaan sida barnaamijyadu u shaqeeyaan oo ay ka dibna warbixinno u qoraan. **Xogaha gaarka ah (la aqoonsan karo) ee adiga ama ilmahaaga marnaba kama muuqan doonaan warbixinnda.**
- Hay'adda Johnstad & Associates and Wilder Research, taasoo u adeegsata xogaha ardayda inay sameeyaan cilmi-baaris iyo inay qoraan warbixinno. **Xogaha gaarka ah (ee la aqoonsan karo) ee ku saabsan adiga ama ilmahaaga marnaba kama muuqan doonaan warbixinnda.**
- Xafiisyo/xirfadleyaal kale ayaa arki karo xogahaaga haddii uu sharcigu u baahan yahay in xogahaas la fasaxo (sida amar maxkamadeed ama warqad maxkamadeed).

DHAMMAAN ururada kor ku xusan waxay isku raacsan yihiin inaysan u oggolaan urur kale inuu helo xogaha aynu uruuriinno iyadoon la haysan oggolaanshaha waalidka/mas 'uulka ama ardayga.

Waa maxay xuquuqdaada la xiriirta xogta loo ururiyay barnaamijka Flipside?

- Waaad xaq u leedahay inaad heshid nuqul ka mid ah xogaha ay degmada SPPS ka hayso ilmahaaga.
- Waaad xaq u leedahay inaad saxdid wixii khalad ah ee ku jira xogaha quseeyo ilmahaaga,
- Haddii aad is ileedahay waxaa lagu xadgudbay xuquuqdaada gaarka ah ama tan ilmahaaga, waaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbisid ururkan Flipside ama Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota (xafiiskooda ah: Data Practices Compliance Officer, Minnesota Department of Education, 1500 Highway 36 West, Roseville, MN 55113).

Haddii AADAN RABIN in xogaha ilmahaaga la ururiyo iyo/ama loo isticmaalo cilmi-baaris iyo qiimeyn la xiriirta ka-qaybgalkooda barnaamijka Flipside saacadaha iskoolka ka dib, Fadlan saxiix oo ku soo celi foomkan cinwaanka Flipside Office ee 1495 Rice Street, St. Paul, MN 55117 ama iimayl ahaan ku dir flipside@spps.org.

| | |
|--|---------------------------------|
| Magaca Koowaad ee Ardayga (fadlan far waaweyn ku qor): | Magaca Awoowaha: |
| Magaca Iskoolka Ardayga ee Deyrta 2023: | Fasalka Ardayga ee Deyrta 2023: |
| Lambarka Qadada ee Ardayga #: | Taariikhda Dhalashada: |
| Saxiixa waalidka/mas'uulka | Taariikhda: |